

Tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca) ayaa la heli karaa ballan la'aan

Abril 15, 2021

Tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca) ayaa heli karaa dadka reer Alberta ee u qalma ballan la'aan oo isla maalintiiba ee Edmonton iyo Kaalgari (Calgary).

Laga bilaabo Abriil 17, Adeegyada Caafimaadka ee Alberta waxay aqbali doonaan dadka iska yimaada ballan la'aan ee rugta caafimaadka degdegga ah ee hadda jira ee ku taal Xarunta Edmonton EKESBO (EXPO Center) iyo Xarunta caafimaadka Soothbort (Southport) ee Kaalgari (Calgary).

Tan waxaa sii dheer 26 ka farmashiye ballan la'aanta la tago ee Kaalgari (Calgary) iyo Edmonton oo bixiya tallaalada reer Alberta ee da'doodu udhaxeeyso 55 ilaa 64 jir.

Qof kasta reer Alberta ah oo da'daan ah, iyada oo aan loo eegin meesha ay ku noolyihiin, wuu tagi karaa goobahan si uu u helo tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca) ballan la'aan.

Xilligan, 710 farmasiye ayaa sii wadaya inay bixiyaan ballamada tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca) iyo xarumaha caafimaadka degdeg aan ballanta u baahneyn sida Xarunta Shirarka Telus (Telus Convention Centre) ee Kaagari (Calgary) oo ay sii wadi doona inay ballamaha tallaalka ee AstaraSeneka (AstraZeneca).

Qiyaasta ugu horeysa ee AstaraSeneka (AstraZeneca) waxay yareysaa infekshinka 60 ilaa 70 boqolkiiba iyo, gaar ahaan, waxaa hoos udhacay boqolkiiba 80 isbitaal dhigida iyo halista dhimashada. Iyadoo kiisaska COOFID-19 ay sii kordhayaan, waxay hadda siineysaa badbaado dadka oo haddii kale sugi lahaa muddo bil ah si ay u helaan tallaal kale.

In kabadan 27,500 qiyaasood oo ah tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca) ayaa laga bixiyay Alberta, oo ay weheliso 58,000 oo qiyaasood oo ah KoofiSHIELD('CoviSHIELD/AstaraSeneka (AstraZeneca)'). Ma jiraan kiisas la xaqiijiyey oo ah xinjirowga ee loo yaqaanno dhiiga dhifka brothorombotik (prothrombotic) oo tallaalka uu sababo difaaca xinjirowga dhiiga (hrombocytopenia) (VIPIT) ee Alberta, iyo hal kiis oo keliya Kanada oo dhan.

Waa muhiim in la fahmo in halista VIPIT ee reer Alberta ay aad u yar tahay. Waxay aad ugu dhowdahay inaad la kulanto xinjirowga dhiigga ee sigaarcabista, dhicitaanada/dhaawacyada iyo dhacdooyinka kale ee maalin kasta dhaca.

Si kastaba ha noqotee, halista natiijada xun ee ka timaadda infekshanka KOOOFID-19 waa mid aad dhab u ah oo leh suuragal aad u sarreeya, gaar ahaan da'da sii kordheysa.

Khatarta isbitaal dhigida ee daaweynta KOOOFID-19 ee da'da 55 ilaa 59 waxay qiyaastii 1,500 jeer ka weyn tahay halista VIPIT, iyo halista dhimashada ee ka timaadda KOOOFID-19 ee kooxdan ayaa qiyaastii 125 jeer ka weyn halista VIPIT.

Liiska farmasiyaasha aqbalaya in la tago ballan la'aan, iyo sidoo kale kuwa qaadanaya ballamada ku saleysan tallaalka, booqo bogga Alberta Buluu Koros ([Alberta Blue Cross website](#)).

Xarumaha adeegyada caafimaadka (AHS) ee latago ballan la'aanta waxay furmi doonaan 17ka Abriil waxayna socon doonaan muddo shan maalmood ah si ay u bilaabaan. Rugaha caafimaadka waxaa lagu kordhin doonaa iyadoo loo eegayo tallaalka jira iyo baahida loo qabo.

Goobta Soothport (Southport), 10301 Southport Lane SW ee Kaalgari (Calgary), waxay shaqeyn doontaa Abriil 17-21 (Sabtida illaa Arbacada), laga bilaabo 8:30 subaxnimo ilaa 3:45 galabnimo.

Xarunta Edmonton EKESBO (EXPO), oo ku taal 7515 118 Avenue NW, ayaa shaqeyn doonta:

- Abriil 17-18 (Sabti iyo Axad): 12:30 pm. ilaa 4ta galabnimo
- Abriil 19-20 (Isniinta iyo Talaadada): 12:30 pm ilaa 6:45 pm
- Abriil 21 (Arbaco): 12:30 pm ilaa 4ta galabnimo

Goob kasta oo Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) ah waxay awood u leedahay 500 AstaraSeneka (AstraZeneca) oo la tago balan la'aanta si ay u bilawdo. Tirada dadka ayaa lagu saleyn doonaa iyada oo la eegaya baahida. Fadlan booqo [AHS.ca](#) wixii hagaajin ah ee saacaddaha furitaanka rugaha caafimaad.

Qof kasta reer Alberta ah oo u qalma wuxuu ballansan karaa iyadoo adeegsanayo aaladaha ballansashada ee Adeegyada Caafimaadka ee Alberta ama wac 811 si aad u hesho tallaalka AstraZeneca.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka iyada oo tilaabooyin sax ah loo marayo, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xaqiiqooyin degdeg ah

- Waqtigaan la joogo, 26 farmashiye oo ku yaal Kaalgari (Calgary) iyo Edmonton ayaa bixiya tallaalkada aan ballanta u baahneyn ee tallaalka AstaraSeneka (AstraZeneca), oo ay ku jiraan farmashiyeyaal madax bannaan iyo goobo waaweyn oo isku xiran. Liiska farmasiyadan waxaa laga heli karaa websaytka Alberta Buluu Koros (Alberta Blue Cross).
- Dhammaan dadka reer Alberta ah u-qalma Wajiga 1, 2A, 2B iyo qayb ka mid ah 2C waxay sii wadi karaan inay qabsadaan ballamo tallaalka oo KOOFID-19 lana galaan farmashiye kasta oo ka qaybgalaya ama Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS).

Xogta la xiriirta

- Xobta KOOFID-19 ee loogu talagalay dadka reer Alberta ([COVID-19 info for Albertans](#))
- Qalabka la isku Qiimeeyo ee KOOFID-19 ([COVID-19 Self-Assessment Tool](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Jerrica Goodwin](#)

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

[Tom McMillan](#)

780-422-4905

Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

Si aad u hesho ilaha la tarjumay ee dawladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.